



Ra'yi ururinta ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha oo la qorsheeyay in ay bilaabanto

Qorshaha Dugsiyada Dadweynaha Portland uu dabada ka riixayo ee isticmaalka xogta si loo gaaro go'aano laga warqabo oo ku saabsan jawiga dugsiga iyo dhaqanka ayaa qaadi doona qaadan tallaabo weyn toddobaadyada soo socda iyada oo lagu bilaabayeo Ra'yi ururinta Dugsiyada Guusha leh.

Saddexda qaybood ee bulshada PPS ayaa ka qayb qaadan doonta ra'yi ururinta aanu magacu la socon. Ardaydu waxay ka qayb qaadan doonaan laga bilaabo Febraayo 4-22, qoysaska Febraayo 4-Maarsa 1, iyo shaqaalaha dugsiga ku saleysan Febraayo 19-Maarsa 8. Mawduucyada ra'yi ururinta waxaa ku jiri doona jawiga dugsiga, ammaanka dugsiga iyo caqabadaha la xiriira ka qayb qaadashada.

“Waxaan u baahanahay codka ardayga, qoyska iyo shaqaalaha anaga oo noqonayna nidaam dugsi oo macluumaadka ka hela xogta,” ayay sheegtay Yvonne Curtis, oo ah Ku xigeenka Kormeeraha Guud, Waxbarashada iyo Bulshooyinka Dugsiga. “Natiijooyinka waxay bixin doonaan meel wax laga bilaabo oo naga caawin doonta in aanu qiyaasno horumarka sanadkeena labaad ee hirgelinta Ra'yi ururinta Dugsiyada Guusha leh.”

Qaybta ardaydu waxay ra'iyyi ururintaa lagaga qaadi doonaa saddex heer oo fasall: fasallada shanaad, fasallada toddobaad iyo ardayda sanadkii dhiganaysa dugsiga sare. Waxaa loogu talagalay in ay bixiso aragti laga helo ardayda dugsiga hoose, dhexe iyo sare.

Waalid kasta ama mas'uul kasta oo degmada ka tirsan waxaa lagu martiqadi doonaa in ay qaataan ra'iyyi ururinta, taasi oo ay heli doonaan qoysasku iyada oo ku qoran Ingiriisi, Isbaanish, Vietnamese, Chinese, Russian iyo Soomaali. Dhammaan shaqaalaha dugsiga ku saleysan sidoo kale ra'yi ururinta ayaa laga qaadi doonaa.

PPS waxay dadaalkan ka qayb galinaysaa hawl-wadaage cusub [Panorama Education](#), oo ah shirkad qaran ahaan la aqoonsan yahay oo bixisa cilmi-baarlis ku saleysan ra'iyyi ururinta. Barnaamijka Panorama wuxuu dadka u saamaxaa in laba toddobaad gudahood lagu helo jawaabta loogu talagalay warbixinta, waana meel macluumaadka laga helo ‘dashboard’ oo si fudud loo geli karo, wuxuuna leeyahay awood la isku barbardhigo natiijooyinka kaasi oo aan kaliya ahayn degmada dhexdeeda, balse sidoo kale la barbardhigi karo guud ahaan degmooyinka dalka oo dhan.

Tusaalooyinka ra'iyyi ururinta ee dhammaan saddexda qaybood, iyo macluumaad kale, ayaa laga helayaa, [Website-ka Ra'yi ururinta Dugsiyada Guusha leh](#).